

In la ahaado kuug fiican oo keliya kaafi ma aha.

Haddii aad raacdo talooyinkan yaryar waxaad sameyn kartaa wax badan oo aad kaga hortegi karto cunto ku sumowga

Gacmaha dhaq/meydh

Meydh gacmaha kahor inta aanad cuntada sameynin, cunto cunin, marka aad sameyneyso cuntooyin qeydhin oo kala gedisan, suuliga kadib iyo marka aad xafaayada bedesho kadib.

Cid kale cunto ha u karin haddii ey caloosha ama cunuhu ku xanuunayaan amaba nabar caabuqsan uu gacmaha kaaga yaalo.



Isticmaal qalab ama maryo yaryar oo nadiif ah

Looxa wax lagu googooyo iyo midiyahaba badanaa meyd, ilaalina nadaafada miiska madbakha. Maryaha yaryar ee madbakhu waxey noqon karaan hoy jeermis. Ku dhaq mashiinka weelka ugu yaraan 65°C, ama ku radi habeenkii koloriin. Badanaa bedel maradaa. Ha u adeegsan maro isku mid ah miiska badbakha iyo dhulka. Waraaqaha wax lagu qaliyo ayaa ka fiican maryaha yaryar.

Kala ilaali cuntada qeyd-hin iyo cuntada bisil

Kala bedel qalabka aad u adeegsaneyso cuntooyinka kala gedisan ee qeydhin, iyo cuntooyinka qeydhin iyo kuwa bisil. Waxaad sameyn kartaa inaad meydho qalabka marka kasta oo aad cunto nooc ah u adeegsaneyso. Sidan ayaad kaga hortegi kartaa in jeermiska keena cuntada oo lagu sumoobo uu isaga gudbi karo cunto qeydhin ilaa mid bisil.

Aad u diiri

Jeermisku wuxuu aad u jecelyahay oo uu ku tarmaa heerkulka u dhexeeya 10°C ilaa 50°C. Jeermiska badankiisu wuu dhintaa marka cuntada xoog loo kululeeyo- taa macanaheedu waxa weeye heerkul ka sareeya 70°C.

Duqada, hilibka la yaryareeyey, nooc kasta oo digaag ah- iyo hilibka doofaarka waa in markasta si fiican loo shiilo. Waa in waslada oo dhan si fiican loo shiilo – tusaale ahaan buskeetiga iyo wasladaha waa in si fiican dhinacyada looga shiilo waayo halkaa ayuu jeermisku ku jiraa.

Marka aad diirineyo cuntada hadhaaga ah, waa inaad si fiican u diiriso. Haddii aad rabto in cuntada oo kulul la cuno waa inaad iyada oo qiiqeysa aad soo dhigto.

Degdeg u qaboojin

Haddii cuntada aad karisey la cuni doono waqti dheer kadib, waxa fiican inaad si degdeg ah u qaboojiso oo dabadeed dib laga diirsado. Tusaale ahaan dhexdhig digsigu biyo qabow oo walaq kahor inta aanad tallaagada gelinin. Haddii aad cuntada u qeybiso qeybo yaryar, markaa si degdeg ah ayey u qaboobaysaa.

Ilaali heerkulka tallaagada

Cuntada la qaboojisanayo si loo dhigto, waa in tallaag la geliyo. Heerkulka tallaagadu waa inuu ahaado 4°C iyo wixii ka hooseeya. Heerkulka aad u hooseeyaa wuxuu joojinayaa in jeermis cuntada ku dhasho.

Haddii aad cunto ku sunowdo u sheeg Kormeerka cuntada, telifoon 06040.

Mattilsynet